



Sida aan u dirno warar degdeg ah ee PPS.

Mararka qaarkood waxaa dhaca waxyaabo ay qoysasku u baahan yihiin in ay si degdega ah u ogaadaan isla markiiba – xiritaanka dugsiga iyada oo sababtu tahay dhanka cimilada, xaaladaha degdega ah ee dugsiga ama dhacdooyinka gaarka ah. Halkan waxaa ku qoran xusuusin ku saabsan sida aan macluumaadkaasi kuugu soo gudbino.

Fariin Qaadaha Dugsiga: Waxaad heli doontaa digniinaha dhanka farriinta iyo wicitaanada tooska ah ‘auto-dialer’ adiga oo ku helaya telefoonkaaga gacanta kuwaasi oo wata warar muhiim ah iyo macluumaad cusub. Farriin telefoon ku soo dir “Yes” ama “Y” una diraya 68453. Fiiri [wargadahayaga xayaysiiska ‘fliers’](#) wixii macluumaad ah ee dheeraad ah.

Website-ka: Website-keena, www.pps.net, wuxuu yeelan doonaa macluumaad cusub ee degdeg ah. Raadi meesha wax laga sii gelayo ee jaalaha ah ee ku taala dhinaca sare ee bogga hore ee internet-ka marka ay jirto xaalad degdeg ah ama xiritaan cimilada la xiriira.

Twitter: Waxaan isgaarsiinta degdega ah soo gelinaa noocan warbaahinta bulsho. Si fudud [ula soco koontadeena](#) si aad u hesho macluumaad cusub.

Facebook: Waxaan sidoo kale isgaarsiinta degdega ah soo gelinaa Facebook. “Like” [our account](#) to get posts into your timeline.

Wicitaanka telefoonada: Wicitaanada tooska ah ‘auto-dialer’ waxay aadaan lambarka muhiimka ah ee ku qoran foomka diiwaangelinta ardayga iyaga oo ah dhammaan luqaddaha la taageerayo. Xusuusnow in aad dugsigaaga ka cusboonaysiiso macmuulaadka la iskala xiriiriyo haddii lambarka telefoonkaagu isbedelo.